Working together

UNHCR The UN Refugee Agency

Consiliul Național Român pentru Refugiați

# Safarkayga ee Romania

Dhalanyarada ama dayarka ajanibga ah ee aan lala socon iyo kuwa kuwa kala maqan

Nidaamyada magangalyada. Xuquuqda iyo waajibaadka. Midaynta qoyska.

**Broșură în limba somaleză**



# Ku so dhawaaw Romania!

Waxaan hubaa inaad hayso su'aalo badan oo ku saabsan xaaladdaada. “Maxaan samayn doonaa hadda ka dib?”, “Ma sii joogi karaa Romania?”, “Mar labaad ma la kulmi donaa qoyskayga?”.

Dawlada Romania waxe la xariiri doontaa dad kala duwan oo doorkoodu yahay ama shaqadoda tahay inay sugaan ammaankaaga ama nabad galyadada. Dadkaan qaarkood waxe u shaqeyaan dawladda Romania, halka qaar kalena ay u shaqeeyaan hayadaha an dawliga aheen waxa ka miid eh hayada (NGO).



Magace waxaa la dhahaa Salim! Dhibaatooyinkii aan kala so kulmay dalka aa nasal ahaan ka soo jeedo waxe iku qasabtay inaa ka so tago wadanke, sida adiga oo kale, waxaan magangalyo ka dalbaday wadanka Romania. Waxaan kuu sharxi doonaa waxa xiga iyo dadka aad la falgali doonto. Kaliya waa inaad la socotaa waxa so socdo ama qoraalada so socdo.

**Booliska xuduudaha**

Booliska xuduudaha waxu la xariira saraakiisha socdaalka guud ee qaxootiga magacoda lo so gabiyay (IGI) si ay ku caawiyaan oo ay ku geeyaan xarunta IGI.

**Shaqaalaha kormeeraha guud ee socdaalka (IGI)**

Ayaa ku diiwaan galin doona codsigaga magangalyada doonka waxu ku siin doona aqoonsi ku meel gaar ah.

**Adeegyad Guud ee Mamulka Cawinta Bulshada iyo Ilaalinta Carruurta O loso Gabiyay (GDASPC)**

Haddii aad ka yar tahay 16jir waxaad la noolaan doontaa qoys daryeelo caruurta ama waxa luku dajin dona gurri oo ee masuul ka yihiin mamulka guud ee cawinta bulshada iyo ilaalinta carruurta (DGASPC).

**Xarunta IGI**

Haddii aad tahay 16 jir, waxaad dooran kartaa inaad dagto Xarunta IGI.

**La Taliyaha Hayadaha An Dawliga Aheen NGO**

**Wakiilka lo so Magacaabay**

**Habka Magangalyo**

Akhri bayjka 6aad.

**1 Codsiga magangalyada**

**2 Wareysiyo**

**Sarkaalka go'aan-qaadashada**

**Turjumaanka**

**3 Go'aan**

**Oggolaanshaha codsigaaga magangalyada**

Waxay ka dhigan tahay in lagu siiyay ilaalin (sharciga qaxootiga kan ween ama mid ka yar) waa sii joogi karta Romania muddo aan xadidneyn.

**Codsigaagii magangelyo waa la diiday**

Haddii aad u malaynayso go'aanka la gaaray inu khaldan yahay, waxaad ka gudbin karta dacwoo.

**Racfaan**

Cabashadaada waxaa dib u eegi doona garsooraha.

**Racfaan**

Haddii garsooraha diido cabashadaada, waxaad dib u xareen kartaa cabasho cusub oo ka dhan ah go'aankaas. Garsoorayaal kale ayaa dib u eegi doona kiiskaaga waxayna ka gaari doonaan go'aanka uku dambeeyo.


Boliiska xududaha

Masuulka loso magacaabay

Hayada an dawliga ahen ONG

Sarkaalka go'aaminta

Turjumaanka



**Dib u midoobida qoyska**

Haddii codsigag magangalyada la aqbalo, waxaad dalbaan kartaa walidkaa in lukugu keeno Romania. Waxaa akhrisa bogga 16.

# Cutubka koowaad 1

## Waa maxay magangelyo?

Haddii aad ka baqeyso inaad ku laabato dalkaagi, waxaad magangelyo ka dalban kartaa Romania. Magangelyo waa magangalyada caalamiga ah oo ay dawladu siiso, dadka dhibato kala kulmo wadankoda sido kale aan amni ku hesan wadankooda. Waxaa jiro macluumaad dheere eh oo ku sabsan nidaamaka dadka ku lu leh arimahaan:



**Kormeerka Guud ee Socdaalka (IGI) ayaa mas'uul ka ah baarista iyo aqbalka ama diidmada codsigaaga magangalyo.**

## Yaa ku caawin doona?

### Qof wakil eh aya luku so magacabay



Haddii aad joogto Romania qoyskaagana ee ka maqanyhiin, waxaa laguu magacaabi doonaa wakiil ama qof ku caawiyo qofkaas o ka socda agaasinka guud ee caawinta bulshada iyo ilaalinta carruurta (DGASPC). Wakiilka luku magacaabay ayaa hubin doona inaa xuquuqdaada aad hesho am ka caawin dono waxa u bahato inta luku jiro nidaamka magangalyada.



### La-taliyaha ka socdo hayada aan dawliga ahen (ONG)




Waxaa caawin ka heli karta la-taliyaha hayada an dawliga ahen ONG. Isaga/iyada ayaa ka cawinayan inaa fahamto tillaabooyinka aad u raaci donto nidaamka magangalyada. La-taliyaha hayada an dawliga ahen ma gali karo booska wakiilka la so magacaabay wayo waxe leyihin mas'uuliyado ka kala duwan ama isku shaqo mahan. Waydii shaqaaalaha xarunta IGI ama wakiilka wedi side lo xidhiidh qofkaan.

### Shaqaalaha Xarunta IGI



Xarunta IGI waxaa ka shaqeeya saraakiil IGI ah kuwaas oo hubin doona inaad badbaado tahay inta aad joogtid.

### Mas'uulka/sarkaalka go'aaamad



Waa shaqaale uu shaqeeyo IGI kaasoo dib u eegi doono codsigaaga qaxootinimada aad dalbatay kadib go'aan ka gaari doono codsigaaga magangalyo. Masuulka ama shaqaalaha waxu dhagesan doona am ka qaada wixi macluumad aad bixisay wuxuuna ku weydiin doonaa su'áalo dheeraad ah wareysiyadada. Ha warwerin, waa nidaam caadi ah.

### Turjumaan



Inta la kulmeso mas'uulka ka shaqeeyo mesha qaxotiga ee la dhaho magaceda IGI, waxa mesha diyaar ku noqon dono turjumaan sido kaga caawiyo luqadda kaseso inu wax kugu turjumo. Turjumaanka waa inuu ku tarjumaa wax kasta oo adiga iyo kuwa kaleba aad tidhaahdaan, erywalbo hal hal ayu kugu tarjumaa, asago arimahaka ka hadlenin kaliya waxa dhahdo ayu ku tarjumaa. Hadii aada fahmin waxu tarjumaanka shegaayo ama ku tarjumaayo, uu sheeg asaga ama ayaga adigoona ka lablabeynin.

# Cutubka 2

## Aan aragno tillaabooyinka ay tahay inaad raacdo!



### Sidee u shaqeeyaa habka magangalyada?

Markaad timaaddo xarunta IGI, saraakisha/mas'uuliyinta waxe ka codsan doonaan (DGASPC) inay ku magacaabaan qof ku noqdo wakiil ama cawiyo. Hadii aad ka yar tahay 14 sano jiir, wakiilka luku magacaabay ama qof mas'uulka ka eh aya so gudbin doono codsigaga isagoo ku hadlayo magacaaga. Hadii aad ka wentahy 14 jir, codsigaga adiga aya gudbisan karo lakiin waa inuu ku saxeexa wakiilkaaga.



*Waxay qaadan kartaa wakhti intaa ka heleso wakiil. Intaa aad sugayso, waxaad waydiisan kartaa caawimo ama macluumaad shaqaaalaha xarunta aad ku nooshahay ama lataliyaha hayada an dawliga ahen ee la dhaho NGO. Doorkoodu waa inay arrimaha kuu fududeeyaan.*



### Soo gudbinta cadeemaha

Waa inaa soo gudbisaa wixii cadeemo aad hesato, sida baasaboor, shahaado dhalasho ama hadii waraaqado kale oo aqoonsi eh aad hesato. Hadii aadan haysan wax waraqado kale, waxa dhibaan karta cadeemoyin kale side shahadad iskoolka, ama wax kasto cadeemo eh oo cadenayo xage ka tiimid meeqsano aya jirtaa. Cadeemahan waxay ka caawinayaan sarlkaalka ama mas'uulka wax xukumayo inuu sifican u fahmo xaaladdaada. Ha werwerin, codsigaaga magangelyo doonka waa la tixgelina doonaa xitaa haddii aanad haysan cadeemo ama warqado ka yimid waddankaagii.



## Wareysiyada

Mas'uulka ama Go'aamiyehu wuxuu ku wediin doona su'aalo ku saabsan sababta aad u codsaneyso magangalyada. Wakiilka luku magacaabay waa inuu kula jogaa waraysiga, sido kale waxaad cawinaad waydiisan karta lataliyaha hayada NGO. Waxa kale oo mesha waraysiga joogi doona tarjumaan ka si uu kaaga caawiyo in inu kugu tarjumo luqada kaseso. Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato waraysiga, weydii wakiilka ama lataliyaha hayada an dawliga ahen NGO.

### Aad muhiim u ah:

*Haddii waalidkaa ama qaraabadaada ay jogaan waddamo kale oo yurub ah, u sheeg wakiilka ama mas'uulka go'aanka garaayo sida ugu dhakhsaha badan haddii aad rabto inaad ku biirto.*

Hadii aad ka weyn tahay 14 sano, faraha aya sawir laka qaadayaa. Ha werwerin, waa habraac caadi ah! Kadib waxaad heli doontaa kaar aqoonsi oo ku meel gaar ah oo eh kaarka magangalyo doon ka ah. Kaarka aqoonsiga mar walbo aad ka baxeso xarunta aad ku noshahy horay uu qaado.

### Xaqiijinta da'da:

Mararka qaarkood IGI waxay waydiisankartaa dhakaatiirta inay hubiyaan da'daada. Ha ka werwerin haddii arintan dhacdo, sababtoo ah waa nidaam fudud. Dhaqatarka waa khabiir arimaha caruurta ku sabsan yaqaano sida kuwa adigo kale eh, waxa kaliya ee isaga ama iyadu ay sameyn doonaan waa in ay ka qaadaan xoogaa cabbiro jirka ah si loo xaqiijiyo da'daada. Haddii aad ku faraxsanayn hababkan, kala hadal welwelkaaga wakiilkaaga ama shaqaalaha xarunta IGI.

### Xusuusnow:

Waxay qaadan kartaa wakhti ka hor ita aanad helin go'aanka codsigaaga magangelyo doonka eh. Ilaa wakhtigaas, waa inaad sii joogtaa xarunta aad ku nooshahay, halkaas oo aad ka heli doonto taageerada (wixi dheeraad ah ka sii akjri bogga 14).

Wakiilka ay soo magacawday DGASPC, sida ay xaaladdu tahay, lataliyaha hayada an dawliga ahen NGO aya kula socodsiin dona halka uu marayo nidaamka. Haka lablabenin inaa aad waydiiso macluumaad dheeraad ah.

## Go'aanka codsigaaga magangelyo

Mas'uulka waxu go'aan ka gari doona dhammaan xogtaada iyo cadeemaha aad bixisay wuxuuna go'aan ka gaari doonaa codsigaga magangelyo doonka eh wakiilka luku magacaabay iyo lataliyaha NGO ayaa kaa caawin doono inaad fahanto go'aanka aad heshay.



**Haa.**
Waa luku ogolaaday codsigaaga magangelyo doonka waxay ka dhigan tahay in laku siiyay qaxootinimo. Miid heer sare eh qaxootinimo ama miid hoseso. Waxaad joogi kartaa Romania wakhti aan xadidnayn. Waxaad sii wadi doontaa inaad hesho kaalmada DGASPC ilaa aad ka gaadhayso 18 ama ilaa aad dib ula midoobeso qoyskaaga.



**Maya.**
Diidmada codsiga magangalyada macneheedu waxa weeye in sarkaalka IGI ee go'aanka gaadhaya uu u arko in sababaha la bixiyay aanay xaq u lahayn ilaalinta. Hadii aadan ku raacsanayn go'aanka, waxaad xareyn kartaa cabsho ka dhan ah adigo ka shanayo wakiilkaga ama lataliyaha hayada an dawliga ahen NGO. Kala hadal arimahaga sida uku dhaqsiyaha badan, maadaama aad hesato 10 maalmood oo kaliya inaad codsato. Waxay sidoo kale isku dayi doonaan inay ku helaan qareen, markan waa inaa la hadasha qaadiga.



## Ogow xuquuqdaada!

Wakiilka luku magacaabay, sarkaalka IGI iyo la taliyaha hayada NGO aya ku shegayaan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga. Waxay hubin doonaan inaad hesho caawinaad iyo adeegyaada aad u bahan tahay, sida:

- Cunto
- Meela ad dagto
- Daryeel caafimaaad
- Taageerada xalada nafsiyan iyo caawinta marka aad marayso waqti adag
- Hawlaha madadaalada
- Alaabooyinka daryeelka

## Xaaladaha degdega ah, waxaad wici kartaa:

- **119** - khad/nambar gaar uu ah carruurta waa wici kartaa mar walbo aad khatar dareento
- **112** - nambarka telefoonka guud ee booliiska iyo xaaladaha degdegga ee cafimaadka

Romania waxe ka miid tahy, guud ahaan waxaa loo arkaa waddan amaan ah, lakiin waxaan kugula talineynaa marka aad ka baxeso xaruunta ku nooshahay inaada kaligaga aad bixin, gaar ahaan habeenkii. Hadii qof isku dayo inuu ku siiyo alaab(lacag ama sigaar) ama walaxo sharci darro ah (sida daroogooyinka iyo dawooyinka aan dhaqtaarka ku so qorin) ha aqbalin oo ka fogow.

## Adeegyada bulshada



Wakiilkaaga wuxuu la shaqeeyaa koox ay ku jiraan khabiiro ku taqasusay arimaha bulshada. Waa dadka qiimenayo baahiyahaaga sido kale waa dadka kugu hagaayo wixi kugu habboon.

## Waxbarashada

Inta aad sugayso go'aanka codsigaaga magangalyada, waa inaad aada iskoolka. Haddii aadan ka diwaan gashnin iskoolka, la xariir wakiilkaaga. Iskuulka wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa noloshaada iyo mustaqbalkaaga, sido kale waa meel ficin oo aad saaxiibo ku kasban karto.

## Badbaadada

Xusuusnow marka aad dareento khatar ama xaalad caafimaad oo degdeg ah, waxaad wici kartaa lambarada degdega 119 (khadka loogu talagalay carruurta kaliya) 112.


## Taageerada nafsiga ah

Haddii aad baqayso, seexan kari waydo, murugo ama welwelsan tahay, dhaqtarka cilmi nafsiga ayaa ku caawin karo. Hadii aad rabto inaad la hadasho dhaqtarka cilmi nafsiga, waxaad waydiisan kartaa wakiilkaaga inuu kula xariirsiyo ayaga.

## Caawimad caafimaad

Haddii aad u baahan tahay dhaqtar, dad ka socda xarunta IGI ama DGASPC ayaa ku caawin doon. Waxaan kugu dhiirigalinayaa sida uku dhaqsaha badan uku sheekto wakiilkaaga dhinbaatooyinka cafimaad eek u heesto. Looma baahno ina casooto ama aad dareemto xishood sababtoo ah waa muhiim inaad daryeesho caafimaadkaa.

## Waa kuwaan qaar ka mid ah adeegyada aad ka faa'iidaysan karto:



## Arimaha madadaalada

Waxaad ka qaybqaadan kartaa waxqabadyada madadaalada kuwaas oo kaa cawin doona inaad samaysato saaxiiboiyo si aad si fiican u fahanto deegaankaaga.

## Hooy iyo cunto

Intaa aad joogtid, waa inaa heshaa cunto iyo meel amaan ah oo aad ku nolaata. Haddii aad ka yar tahay 16 jir, waxaad ku sii jiri donta meesha carruurta luku talagalay ee DGASPC*, haddii aad ka weyn tahay 16 sano, waxaad dooran kartaa inaad ku nolaato xarunta IGI**.

*Adeegga DGASPC waa meel si gaar ah loogu diyaariyey in lugu xanaaneeyo carruurta ee kala maqaan yahin waalidkooda si ku meel gaar ah ama si joogto ah uga maqan iyo carruurta aan lala soconin la dejin karo. Halkaan waxaad ka qaybqaadan kartaa waxqabadyo waxbarasho iyo madadaalo kuwaas oo kaa caawin doona horumarinta. Waxaa muhiim ah in la ixtiraamo shuruucda adeega shaqaalaha iyo in laka qaybhalo munaasabadaha abaabulan.

**Xarunta IGI waxay martigelisaa magangalyo-doonka iyo qaxootiga ka imaanayo wadamo kala duwan, dadka waaweyn iyo carruurta. Si aad ugu noolaato xaalad wanaagsan xarunta, waa inaad ixtiraamto asxaabtaada guriga, xeerarka xarunta oo aad ilaaliso iyo nadaafadda. Halkaan waxa kalo oo aad ka haeli doonta la taliyayaal ka socda hayada aan dawliga ahen NGO kuwaas oo aad caawimaad ka raadsan karto.

## Kaalmada maaliyadeed

Waxaad xaq u leedahay lacag bile ah marka dalbato magangalyo, sido kale marka hesho ogolaanshah magangalyo doonka. Waxe leedahy faafaahin dheeraad ah, wedii wakiilkaaga ama lataliyaaha hayada aan dawliga aheen NGO.

## Shaqada

Carruurta badanaa ma shaqeeyaan sababtoo ah waxe aadan iskuulka wayo dada ee jiraan waxa muhiim eh in aadan iskool. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad ka weyn tahay 16sano, waad shaqyan kartaa. Kala hadal wakiilka iyo lataliyaha NGO xaaladaha shaqada.

## *Ma ogtahay inaad keni karto waalidkaa Romania haddii codsigaga magangalyada doonka la ogolaado?*



Nidaamkan waxaa loo yaqaannaa isu-keenida qoyska, wakiilkaaga iyo lataliyaha hayada an dawliga ahen NGO ayaa ku sharxi karo waxaad u bahan tahay inaad sameyso si aad u codsato IGI.

*Xasuusnow kaliya waxaad codsan karta waalidkaa haddii codsigaaga magangalyo doonka la oggolaado!*



### Maxaan u baahanahy inaa sameeyo si aan u codsado isukeenida qoyska?

Waa inaa u gudbisaa codsi IGI, oo ay la socdaan dukumeenti cadeynaya aqoonsiga waalidka iyo xiriirka qoyska iyaga. Codsigaaga midaynta qoyska waa la tixgelin doonaa xitaa haddii aanad haysan cadeemo ama dukumentiyo.

Haddii aad ka yar tahay 16 sano, wakiilka luku magaacaabay aya ku xareenayo faylkaaga isago ku hadlaya magacaaga. Haddii aad ka weyn 16 sano, adiga ayaa soo gudbisan karo, laakiin waxa lama huraan ah inaa codsigaga uu saxiixo wakiilkaga.






### Sugitaanka go'aanka

Waxay qadankartaa go,aan qaadashada immigration ku 9bilood kisaska qaarna waxa lagu darikara 6bilood.



### Codsigaagu wuxuu noqon karaa:

**Waa luku oggolaaday** - xaaladdan oo kale, waxaad taageero ka codsan kartaa hayada an dawliga aheen NGO si ay kaga caawiso waalidiintaada inay helaan fiisaha ay ugu socdaalaan Romania.
**Waa la diiday** - waxaad xareyn kartaa cabasho adigo oo kaashanayo wakiilkaaga iyo lataliyaha hayada an dawliga aheen NGO.



### Maxaa dhacaya ka dib markay waalidiintada yimaadaan Romania?

Kadib markaad timaadan Romania, walidkaa waxay codsan doonaan magangalyo, sidaad adiguba samaysay. Intaa ka dib, DGASPC, waxay isku daye ine hubiso inay awoodaan inay ku daryeelaan. Sababtas ogeed, waxay qaadan kartaa wakhti ka hor intaadan la noolaan iyaga.



*Markaad raacdo tillaabooyinkan, waxaad mar kale la noolaan dontaa waalidiintada!*

## *Faahaahinta xiriirka ee waxtarka leh ee ku cawin kara:*

### Golaha qaxootiga ee wadanka Romania

+40 21 312 6210
office@cnrr.ro
www.cnrr.ro


### UNHCR

+40 723 653 651

Si aad u hesho macluumad  lagu tiirsan karo  iyo adeegyo iyo kaalamada. Si aad cabasho u so gudbisato ama jawaab celin Sacadaha uu furanyahay 08:00-1600.



*Waxa so gashay safar dheer, hadda waa waqtigii aad is-macsalaamayn lahayd! Waan ogahay in imaanshaha waddan cusub ay adkaan karto, lakiin xusuusnow Inay jiraan dad halkaan ku caawinayo. Ha ka cabsanin inaad weydiisato caawin!*



Working together

UNHCR
The UN Refugee Agency

Consiliul Național Român pentru Refugiați

Golaha qaranka ee qaxootiga Romania (CNRR) waa urur an dawli ahayn oo la aasaasay 1998. 2003, CNRR waxay heshay adeega dadweynaha. CNRR hadda waa la hawlgalayaasha fulinta ee matalaadda UNHCR ee Romania.

Hadafkeno waa inaa kor u qaadna oo difaacna xuquuqul insaanka anago adegsaneno dhamman hababka sharciga ah guud ahan iyo gaar ahaan xuquqda qaxootiga iyo magangalyo-doonka. CNRR waxe bixisaa adeegyoyin la-talin eek u saabsan qanuunka qeebihisa kala duwaan. Dhamman adeegyadan waxaa luku bixiyaa lacag laa'an.

Daabacaaddan waxa soo saaray CNRR oo taageero maaliyadeed ka heshay hay'adda qaramada midoobay u qabilsan qaxootiga iyo wakiilkeeda Romania. Nuxurka daabacaadan gabi ahaanba waa mas'uuliyadda CNRR qasab maaha inay ka tarjumayso jagada rasmiga ah ee komishinka.

Dhamman shaqaalaha CNRR waxaa looga baahan yahay inay u hoggaansamaan heerarka anshaxa iyo bani'aadamnimada si loo xaqiijiyo daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka. Haddii ay dhacdo cabashooyin. Walaac dhibaatooyin ku saabsan hab-dhaqanka ama hab-dhaqanka shaqaalaha CNRR, isla markiiba uga saabsan hawlaha CNRR, fadlan nagala soo xidhiidh iimaylka cinwaanka soo socda: feedback@cnrr.ro.